

# Su'aalaha Inta Badan La is Weydiyo ee Kordhintaa Qiimaha Daryeelka Guriga Qoyska ee Shatiga leh

**S: Waa immisa kharashka kobcinta qiimaha daryeelka?**

J: Kobcinta Qiimaha Daryeelka Guriga Qoyska ee Ruqsadda leh waa \$2,000 bishii adeeg la qabto.

**S: Immisa kharash ah oo kordhintaa heerka daryeelka ayaan heli karaa?**

J: Laga bilaabo Luulyo 2022 oo dhammaanaysa Juun 2023, bixiyeyaasha waxay xaq u leeyihiin hal kharash oo kordhintaa heerka daryeelka bishii adeegga.

**S: Maxay tahay in aan sameeyo si lacag la ii siiyo?**

J: Lacagtan waxaa si toos ah loo siin doonaa bixiyayaasha xaqa u leh. Bixiyayaasha loogama baahna inay si toos ah u raadsadaan lacag bixinta adeeggan. Koodhka adeegga SSPS ee lacag bixintan waa 01910.

**S: Goorma ayaan lacagta ugu horreysa la bixin doonaa?**

J: DCYF waxay habayn doontaa kharashka ugu horreeya ee Qiimaha Guriga Qoyska ee Ruqsadda leh ee Kobcinta Qiimaha Daryeelka Sebtembar 2022 ee adeegyada Luulyo 2022.

**S: Goorma ayaan heli doonaa lacag-bixinta?**

J: Bil kasta, lacag-bixinta waxa la farsamayn doonaa bartamaha bisha. Fadlan maskaxda ku hay in habbaynta lacag bixinta elektarooniga (electronic) ah iyo Adeegga Boosta (Postal Service) ee Maraykanku ay qaadan karaan dhawr maalmood oo shaqo, taas oo saamaynaysa taariikhda saxda ah ee bixiyayaasha ay helaan lacag bixinta marka la habeeyo.

**Sideen ku heli karaa lacagtayda?**

A: DCYF waxay ku bixin doontaa lacag-bixinnada iyadoo isticmaaleysa nidaamka loo yaqaan SSPS. Kharashka qiimaha daryeelka ee la kordhiyey waxa loo siin doonaa bixiyayaasha si la mid ah lacagta kabida.

**S: Maxaa dhacaya haddii aanan codsanin qaansheegta adeegayga dhamaadka bisha xigta?**

A: DCYF waxay habayn doontaa lacag bixinta iyadoo ku saleysan u qalmida bixiyaha. Marka bixiyaha uu noqdo mid u qalma bil kasta oo adeeg ah, kharashka hagaajinta heerka ayaa la soo saarayaa.

Daryeel bixiyayaasha ayaa haysta saddex bilood si ay u dalbadaan qaansheegta adeeggooda daryeel bixiyayaashana waxaa la siin doonaa kharashka kobcinta heerka daryeelka marka ay buuxiyaan shuruudaha u qalmitaanka ee loo baahan yahay. Waa suurtgal in daryeel bixiyaha uu dalbado



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

Taariikhda Asalka ah: Abriil 27, 2022

Qaybta Waxbarashada Hore | Qaybinta Waxaa Oggolaaday Jason Ramynke, Maamulaha Kaalmada

adeegyada Luulyo bisha Oktoobar haddii ay sidaas sameeyaanna waxa la siin doonaa kharashkooda kobcinta heerka daryeelka bisha Noofambar 2022 haddii aanay hore u helin kharashkooda kordhinta qiimaha daryeelka ee Luulyo.

**S: Yaan kala xiriiraa su'aalaha?**

J: Wuxaan DCYF Provider Line ka wici kartaa lambarkan 1-800-394-4571 ama iimayl providerhelp@dcyf.wa.gov.

**S: Goorma ayaan xaq u yeelanayaa in aan helo Kordhinta Qiimaha Daryeelka Guriga Qoyska ee Shatiga leh?**

J: Guryaha qoyska ee shatiga haysta waa inay buuxiyaan shuruudahan soo socda bil kasta oo adeeg la bixiyo:

- Daryeel bixiyuhu waxa uu helay lacagta xadka ah ee kaalmada daryeelka ilmaha:
  - Bisha adeegga ee hada jirta; ama
  - 2 ka mid ah 3dii bilood ee u dambaysay oo adeeg la bixiyey; ama
  - 4 ka mid ah 6dii bilood ee u dambaysay oo adeeg la bixiyey.

**Waa Kan Bandhig Muuqaaleedka Luulyo 2022 Qarashka U Qalmitaanka Kordhinta Qiimaha Daryeelka:**

Daryeel bixiye ayaa heli doona qarashka bisha adeegga ee Luulyo 2022 ee kharashka kordhinta qiimaha daryeelka marka ay buuxiyaan mid ka mid ah shuruudaha soo socda:

*Daryeel bixiyuhu ma helay qarashka adeega bishii Luulyo? Hadday haa tahay, markaa wuu u qalmaa. Hadday maya tahay, markaa ku soco tallaabada xigta:*

Ma U Qalantaa Abaalmarinta Luulyo 2022?	Lacag Bixinta Adeegga Bisha Febraayo?	Lacag Bixinta Adeegga Bisha Maarso?	Lacag Bixinta Adeegga Bisha Abril?	Maajo Lacag Bixinta Adeeggeeda?	Lacag Bixinta Adeegga Bisha Juun?	Luulyo Lacag Bixinta Adeeggeeda?
Haa						Y

*Daryeel bixiyuhu ma helay qarashka adeega bilaha Maajo iyo Juun? Hadday haa tahay, markaa wuu u qalmaa. Hadday maya tahay, markaa ku soco tallaabada xigta:*

Ma U Qalantaa Abaalmarinta Luulyo 2022?	Lacag Bixinta Adeegga Bisha Febraayo?	Lacag Bixinta Adeegga Bisha Maarso?	Lacag Bixinta Adeegga Bisha Abril?	Maajo Lacag Bixinta Adeeggeeda?	Lacag Bixinta Adeegga Bisha Juun?	Luulyo Lacag Bixinta Adeeggeeda?
Haa				Y	Y	

*Daryeel bixiyuhu ma helay qarashka adeega bilaha Febraayo, Maarso, Abril, iyo sidoo kale mid ka mid ah Maajo ama Juun? Hadday haa tahay, markaa wuu u qalmaa. Hadday maya tahay, markaa uma qalmo kharashka bisha Luulyo ee kobcinta qiimaha daryeekla.*

Ma U Qalantaa Abaalmarinta Luulyo 2022?	Lacag Bixinta Adeegga Bisha Febraayo?	Lacag Bixinta Adeegga Bisha Maarso?	Lacag Bixinta Adeegga Bisha Abril?	Maajo Lacag Bixinta Adeeggeeda?	Lacag Bixinta Adeegga Bisha Juun?	Luulyo Lacag Bixinta Adeeggeeda?

Haa	Y	Y	Y	Y	Y	
Haa	Y	Y	Y	Y		Y